

Family response



Taageerada shakhsi ahaaneed ee degdega ah oo lagu xasilinaayo carruurta ama dhalinyarada iyo waalidiintooda/daryeelayaashooda

612-979-9511

24/7

Wixii ah xaalad degdeg ah, wac 911.

Taageerada qoyskaaga

Haddii ilmahaagu (da'aha 0–18) ay la kulmaan arrin dhimir, habdhaqan, ama shucuureed oo kaa dhigaya inay xad dhaaf kugu noqoto oo aadan hubin waxaad samaynayso, waxaan halkan u joognaa inaan ku caawinno. Ma jirto xaalad aad ugu yar khubaradeena Family Response.

- In shaqsi ahaan lagu arko hal saac gudaheed meel kasta oo ka degantahay Degmada Hennepin.
- Waxaa heli kara qoysaska leh caruur da'doodu u dhaxayso 0–18 iyada oo aan wax kharash kaga bixin.
- Waxaa keenaya qoyskaaga baahidooda dhaqan, bulsho, iyo caafimaad.

Hadafkeenu waa inaan ku ilaalino dhalinyarada iyo qoysaska inay ku xasilaan guryahooda anagoo ka caawinayna inay go'aansadaan kuna xidhmaan taageerada ay u baahan yihiin si ay uga gudbaan.

Taageerada degdega ah, ee qof ahaaneed

Markaad soo wacdo, shaqaaluhu waxay soo ururin doonaan macluumaadka aasaasiga ah waxayna usoo diri doonaan kooxda Family Response goobtaada hal saac gudahood:

- Hoos ugu dhigaan waxna uga qabtaan walaaca degdega ah
- Ula shaqeeyaan una taageeraan qoyskaaga 72 saacadood ee soo socda
- Kuugu xidhidhaan taageerooyinka kale, oo ay ku jiraan adeega xasilinta oo ah sideed isbuuc oo ikhtiyaari ah

Xasilin socota

Kadib 72-da saacadood ee ugu horreeya, adeeg xasilin dhaqan ahaan gaar ah oo soconaya siddeed toddobaad ahna mid bilaash ah, ikhtiyaari ah ayaa gacan ka geysan kara horumarinta fayd-qabka qoyskaaga:

- Kugu taageerayo habdhaqan caafimaad qaba, badbaado leh iyo awoodda ilmahaagu u leeyahay inuu maareeyo hawl maalmeedkooda
- In la abuuro isku xirnaan u dhaxeeso qoyskaaga iyo bulshada dhexdeeda; si loo helo taageerida joogtadda ah.



hennepin.us/family-response